



Ugu dambeyntii la cusbooneysiiyay: Julaaq 1, 2020

## Hagida Dib u furida Gobolka oo dhan – Wakaaladaha Gaadiidka

**Amarka:** Amarka Fullinta Lambarka. 20-27, ORS 443.441, ORS 433.443, ORS 431A.010.

**Khusaynta:** Hagidan waxay quseysaa wakaaladaha gaadiidka dadweynaha iyo bixiyayaasha gobolka oo dhan.

**Hirgelinta:** Ilaa xadka uu hagistan u baahan yahay u hoggaansanaanta qodobbada qaarkood, waa wax la fulin karo sida lagu qeexay Amarka Fulinta ee 20-27, baragaraafka 26.

### Wakaaladaha gaadiidka waxaa looga baahanyahay inay:

- Dib u eegaan ayna hirgeliyaan [Hagida Guud ee loogu tallogalay Badrooniyaada](#).
- Laasimaan ugu yaraan sadex (3) fuud oo kala fogaansho jireed ah oo u dhaxeeyso rikaabyada.
- Laasimaan ugu yaraan lix (6) fuud oo kala fogaansho jireed ah oo u dhaxeeyso darwalka iyo rikaabyada (marka laga reebo inta la fuulayo baabuurka iyo marka la caawinayo kuwa wato qalabyada dhaqaaqa); xoojiyaan sharuudaan iyaga oo saarayo boos celin koraasta sida ku haboon.
- Isticmaalaan kala qaybinta dadk ama baaqyada muuqaalka (tusaale ahaan, istiikarada dhulka, sharootada midabeysan, ama aastaamaha) si looga niyad jabiyo rikaabka inay joogsadaan iyo fariistaan meel in sadex (3) fud ka yar ujirto rikaabka kale, ama in lix (6) fuud ka yar ujirto darawaliinta, iyo shaqaalaha kale ee gaadiidka ee saaran baska/tareenka.
- Go'aamiyaan ayna dhejiyaan mugga ugu badan ee bas walba.
- Wixii nidaamyada tareenka, inay dhejiyaan mugga ugu badan ee tareen walba iyada oo la isticmaalayo calaamado waadax ah, oo sigaar ah loo meeleeeyay. Samey ku dhawaaqyo hadal ah oo ku saabsan mugga ugu badan joogsi walba ka hor iyo kadib.
- Ku dhejiyaan calaamado waadax ah, oo ku qoran wax ka badan hal luuqad, (oo laga helo [healthoregon.org/coronavirus](http://healthoregon.org/coronavirus)) boosteejooyinka/xarumaha gaadiidka oo qorayo aastaamaha COVID-19, weydiinayo gaadiid raaceyaasha qabo aastaamaha inay guriga joogaan, iyo cida lala soo xiriirayo haddii ay u baahan yihiin caawin. Haddii qof qabo aastaamaha ay tahay inuu safro, fadlan isticmaal gaadiid kale, haddii la heli karo.

- Dibu eegaan oo ay hirgeliyaan [Hagida Gobolka oo dhan ee Maaskaraha, Gaashaanka Wajiga, Daboolka Wajiga.](#)
- Siiyaan shaqaalaha gaadiidka saabuun, biyo nadiif ah oo socdo, iyo agabyada qalajinta, ama ugu yaraan jeermisdilaha ku saleysan alkulada boqolkiiba 60-95% oo la dhigo goobtooda shaqada.
- Si joogta ah u nadiifiyaan basaska /tareenada iyo saldhigyada gaadiidka. Samey nadiifinada la diirad saaray afar (4) saacadood ee walba, adigoo diirada saaraya jeermisdilka sagxadaha badanaa la taabto ee baska/tareenka iyo saldhigyada gaadiidka.

Ilaa iyo xadka suurtagalka ah, wakaaladaha gaadiidka waa **inay**, laakin loogama baahno:

- Fulliyaan hal dhinac socod iyada oo baabuurka laga galayo albaabka hore lagana baxayo albaabka dambe.
- Ku isticmaalaan calaamado boosteejooyinka baabuurta si ay u dhiirogeliyaan ka fogaanshaha jireed marka la sugayo baska/tareenka.
- Ku rakibaan saldhigyada jeermisdilaha gacmaha oo ka kooban xal boqolkiiba 60-95% aalkolo ah bas/tareen walba oo illaa xadka suurtagalka ah.
- Tixgeliyaan rakibida xayndabyada bacda cad ah ee u dhaxeeyo darawalka iyo rikaabka markii lix (6) fuud oo ka fogaansho jireed ah aanan la joogteyn karin.
- Aasaasaan xeer iyo hab dhaqan oo lagu bixinayo gaadiid kale oo loogu talagalay raacayaasha jiran oo u baahan gaadiid lagu helayo daryeel caafimaad kaasi oo xadidayo suurtagalka ah in cudurka soo gaaro shaqaalaha gaadiidka iyo xubnaha kale ee bulshada.

### **Ilo Dheeraad ah:**

- [Hagista OHA ee Dadwaynaha Guud](#)
- [Hagista Guud ee OHA ee Loo-shaqeeyayaasha](#)
- [Hagida Gobolka oo dhan ee Maaskarada, Gaashaanka Wajiga, Waji Daboolada](#)

**Helitaanka dukumiintiga:** Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacada balaaran, ama farta indhoolayaasha. Kala xirii Mavel Morales lambarka 1-844-882-7889, 711 TTY ama [OHA.ADAModifications@dhsosha.state.or.us](mailto:OHA.ADAModifications@dhsosha.state.or.us).